

Macluumaadka ku saabsan degenaanshaha Ilaali Sharciga

Waa maxay xaddidaada xoriyadu?

Sida adiga oo kale dad badan oo ku nool guryo lagu xanaaneeyo oo daryeelo ama ah bukaan kujira cisbitaalo. Xoriyadaada dhaqdhaqaaqa ayaa marmar la xaddidadaa si looga hortago khataraha sida dhaawaca ama dhicitaanka.

Tusaaleyaasha xaddidaadahan waxa kamid ah

- meelaha laqabsado ee gaadhi curyaanka ama sariiraha,
- dhinacyada sariiraha,
- albaabada xidhan iyo xataa
- daawooyinka, haddii ay yareynayaan Dhiirigelin dhaqaaqa.

Goorma ayaa xaddidaada xoriyada dhaqdhaqaaqa la ogol yahay?

Xuquuqda asaasiga ee xoriyada shakhsigu waa mid kamida xuquuqaha binaadamka ee ugu muhiimsan. Xoriyadaada waxa kaliya la xaddidi karaa xaaladahan soo socda:

- haddii ay dhacdo dhaawac maskaxeed ama jireed,
- haddii adiga ama dadka kale kujiraan khatar,
- haddii aanay jirin ikhtiyaaro kale ama baddelkale oo ka fiican. Beddelka waxaa ka mid ah sariiraha hoose, matoorrada ka hortaga in la rogoro, matoorrada dareemayaasha ama matoorrada ka hortaga liiqitaanka, tababarka dhaqdhaqaaqa ama qaababka socodka.



© Nina Dietrich



Xuquuq nooce ah ayaad haysataa haddii xoriyadaada la xaddiday?

- Xaddidaada dhaqdhaqaqa waa in laguu sharxo.
- Xaddidaada dhaqdhaqaqa waa in lagaa qaado markiiba haddii ay jiraan ikhtiyaaro kale ama haddii aanad kujirin khatar.
- Guriga ama cisbitaalku waa inuu sidoo kale ku diwaangaliyo dhammaan xaddidaadaha dhaqdhaqaqa qoraal ahaan oo uu ogeysiyo Adeegga Wacyigalinta degenaanshaha.

Waa Maxay Adeegga Wacyigalinta Degenaanshaha?

Wacyigalinta degenaanshaha waxay hubiyaan in xaddidaadaha dhaqdhaqaqa ay yihiin daruuri kuna haboon yihiin.

- Waxay la hadlaan adiga, shaqaalaha iyo maamulayaasha.
- Waxay akhriyaan (daryeelaan) qoraalka.
- Waxa soo jeediyaan baddelka xaddidaada dhaqdhaqaqa oo kusaleysan shakhsiga.
- Haddii aanay hubin, waxay rafcaan u gudbiyaan maxkamada. Maxkamada ayaan kadib hubisa in xaddidaada dhaqdhaqaqa la ogol yahay.

Macluumaad Dheeraad ah

www.vertretungsnetz.at

Ogeysiiska Sharci ah:

VertretungsNetz – Erwachsenenvertretung, Patientenanwaltschaft, Bewohnervertretung

www.vertretungsnetz.at

Vereinssitz: Wien, ZVR: 409593435